**Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM)**

*Sidii loosoo jeediyey*

**Warbixin Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay James Swan uu Golaha Ammaanka ka siiyey xaaladda Soomaaliya**

**22 Febraayo 2021**

Marwo Madaxwayne, Xubnaha sharafta leh ee Golaha,

Waad ku mahadsan tihiin fursaddan ah inaan mar kale golaha warbixin ka siiyo xaaladda Soomaaliya.

Waxaan ku faraxsan ahay inaan si wadajir ah ula soo muuqdo saaxiibkayga qaaliga ah, Danjire Francisco Madeira, Ergayga Gaarka ah ee Guddoomiyaha Guddiga Midowga Afrika. Aan ka faa'iidaysto fursaddan bilowga kal-fadhiga inaan ku ammaano dadaalka iyo naf-hurnimada ciidamada AMISOM ee Soomaaliya ee tan iyo 2007-dii garab taagnaa geesiyaashaa ciidamada Soomaaliyeed.

Kulanka maanta ee Golaha ayaa ah mid ku soo aadey xilli la eegayo horumarrada la taaban karo ee ka dhacayey Soomaaliya todobaadyadii iyo xitaa maalmihii la soo dhaafay.

Xiisadaha siyaasadeed ee sii kordhaya ayaa halis ku ah dhismaha dowladnimada Soomaaliya horumarka iyo xitaa amniga haddii aan lagu xallin wada hadal iyo isu tanaasul oo danta dalku ay ku jirto.

Nasiib darro, taa beddelkeeda waxaan aragnaa qar iska xoornimadii oo korortay, xeeladaha cadaadiska, iyo awood tijaabin kuwaas oo kaliya halisaha kordhin kara.

Khilaafka siyaasadeed ee ka dhex aloosan madaxda muhiimka ah ee Soomaaliya ayaa hor istaagey hirgelinta hannaankii doorasho ee ay ku heshiiyeen Madaxwaynaha Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo madaxda Maamul-goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka 17-kii Sebtembar 2020.

Qaabkan waxaa si rasmi ah u ansixiyey labada aqal ee Baarlamaanka waxaana taageeray dhammaan jileyaasha kale ee waawayn ee siyaasadda, laakiin hirgelintii ayaa muran ka taagan yahay. Tan waan ku soo laaban doonaa arrintan.

Xiisadda ka dhalatay hirgelinta doorashada ayaa hadda waxaa sii dheeraa su'aalo ay qabaan qaar ka mid ah dadka siyaasadda ku jira taasoo ku aaddan sharci ahaanshiyaha xilka madaxwaynaha kaddib markii uu dhacay waqtigiisa dastuuriga ah 8-da Febraayo. Daowladdu waxay soo qaadanaysaa go'aankii Baarlamaanka ee Oktoobar oo u oggolaanaya Madaxwaynaha inuu sii joogo, laakiin inta kale ayaa dood ka qaba arrintan.

Dhinaca kale, subaxnimadii 19-kii Feberaayo oo ku beegan maalin mudaaharaad ay ku dhawaaqeen Golaha Murrashaxiinta Madaxwaynaha ee mucaaridka, ayaa la sheegay inay dhaceen rabshado dhowr ah. Inkastoo tafaasiilaha buuxda ay yihiin

kuwo aan si rasmi ah loo xaqiijin, ayaa lagu soo warramayaa inay ka mid yihiin is-rasaasayn hubaysan oo ay is waydaarsadeen ciidamada ammaanka ee dowladda iyo kooxaha nabadgelyada ee ay wataan mucaaradku, iyo sidoo kale rasaas nool oo ay ku fureen

ciidamada dowladda si ay u kala eryaan dibadbaxayaasha.

Wararka ay bulshada u gudbinayaan madaxda muhiimka ah ayaa noqday kuwo muran iyo khilaaf sii dhalinaya, taas oo daaha ka qaadaysa niyad-jabka, kalsooni-darrada, iyo dareenka cabashada leh ee ay dad badani dareemayaan. Haddaba, xilligan xaalad kacsanaan ah baa ka jirta Soomaaliya, iyadoo hadal-haynta iyo ficilladuba ay sii kordhayaan.

Marwo Madaxweyne, Anigoo ka duulaya arrimaha kor ku xusan, aan si kooban u dul istaago dadaalladii ugu dambeeyey ee lagu sii ambaqaadayo hirgelinta hannaankii doorasho ee 17-kii Sebtembar.

Casuumaad ay ka heleen Dowladda Faderaalka, madaxda DFS iyo kuwa FMS waxay ku kulmeen Dhuusomareeb 2-dii ilaa 6-dii Febraayo, waxayna sameeyeen horumar, balse ma aysan gaarin heshiis kama dambays ah oo laga gaaray qodobbadii la isku hayey, ee kala ahaa: dhismaha hay'adaha maamulka doorashada; Qaabka loo soo xulayo wakiillada “Somaliland” ee hay'adaha federaalka; iyo Maamulka doorashada Gobolka Gedo ee Maamulka Jubaland.

Intaa kaddib, Dowladda Federaalka waxay u yeertey guddi farsamo oo ka kooban wasiirro sare oo ka tirsan XFS iyo FMS, kuwaas oo ku shiray Baydhabo 15-kii ilaa 16-kii Febraayo.

Guddigu waxa ay ku dhawaaqeen in ay gaareen xalal farsamo oo ku saabsan arrimihii la isku hayey, waxa ayna dib u xaqiijiyeen in ay ka go'an tahay qoondada haweenka ee 30% ee geeddi-socodka doorashada, waxa ay sidoo kale xuseen in loo baahan yahay in dib loo eego, balse la koobo jadwalka cusub ee shin-tiriska doorashada.

Iyada oo ku saleysan shaqada Guddiga, Dowladda Federaalka ayaa ku baaqday shir-madaxeedka madaxda DFS iyo FMS in lagu qabto Muqdisho 18-ka ilaa 19-ka Febraayo. Si kastaba ha ahaatee, dhacdooyinkii maalmihii la soo dhaafay ayaa hakad geliyey qorshayaashan, waxaana madaxda Jubbaland iyo Puntland ay ilaa hadda ka gaabsadeen inay ka mid noqdaan madaxda DFS iyo Maamullada kale. Iyada oo ay na weheliyaan saaxiibada kale, waxaan sii wadaynaa dadaalka aan ku fahmayno oo aan wax uga qabanayno tabashooyinka labadan hoggaamiye si ay ugu biiraan geeddi-socodka lagu horumarinayo heshiiskii Sebtembar 17.

Iyadoo la eegayo ismari-waagan walaaca leh, waxaan maalmihii la soo dhaafay si dhow ula shaqeeyey, iyadoo ay i wehliyaan saaxiibada kale ee gobolka iyo kuwa caalamiga ah, in aan la xaalno madaxda DFS iyo kuwa FMS, siyaasiyiinta muhiimka ah, iyo wakiillada bulshada rayidka ah si ay u dhiirri-geliyaan hab horay loogu socdo oo ku salaysan wada-hadal iyo isu-tanaasul salka ku haya danta qaranka.

Farriinta ka timid saaxiibada ayaa caddaysay in aysan dhicin doonin doorasho hal dhinac ah, hanaan isbar-bar yaac ah, iyo tallaabo aan loo dhamayn oo ay qaadaan madaxda Soomaaliyeed. Hababkan oo kale waxay kaliya horseedi karaan kala qaybsanaan wayn iyo khatar iska horimaad.

Marwo Madaxwayne, Aan mid caddeeyo: Waxaan weli ku qanacsan ahay in qaabkii xeer-jajabka ku dhisnaa ee 17 Sebtembar uu bixinayo ikhtiyaarka ugu fiican ee la heli karo si degdeg ah loogu gudbi karo habka doorashada ee lagu soo xulayo xubnaha baarlamaanka, senetarrada, iyo madaxweynaha. Tani waxay yaraynaysaa dib u dhac kale oo ku yimaada meertada kala guurka ah ee Soomaaliya afartii sanaba mar dhacda, iyadoo la hubinayo in madaxda qaranka ee la doortay ay sharciyad cad u helaan xilka loo igmaday, si wayna loo aqbalo, waxayna dalka u ogolaanaysaa in uu dareenkiisa meel kale uga jeediyo loollanka siyaasadeed ee hadda socda, loona gudbo arrimo kale oo muhiim u ah qaranka, iyadoo la eegayo maslaxadda qaranka.

Si loo sii ambaqaado raacista dariiqan, waxaa lama huraan ah in madaxda Soomaaliyeed ay adeegsadaan dhammaan hilinnada la heli karo ee wadahadalka iyo wadatashiga, oo ay ku jiraan xiriirro lala yeesho dhinacyo badan oo siyaasadda daneeya iyo dadka saameynta ku leh bulshada rayidka ah si loo maqlo codkooda muhiimka ah. Si loo dhiso kalsoonida geeddi-socodka, waxa kale oo lagama maarmaan noqon doonta in la hubiyo in maamulka iyo la socodka hannaanka doorasho ee lagu heshiiyey ay noqdaan kuwo dhexdhexaad ah oo madax-bannaan intii suurtogal ah, lana marsiiyo kormeer joogto ah.

Xorriyada siyaasadeed ee asaasiga ah oo ay ku jiraan kuwa hadalka, isu imaatinka, abaabulka, iyo galaagal warbaahinta loo yeesho waa in la hubiyaa. Iyo xiriirka ka dhexeeya jilayaasha ugu muhiimsan - gaar ahaan madaxda DFS iyo FMS - waa in ay sii socdaan si caadi ah oo joogto ah si loo yareeyo ismaandhaafyada mustaqbalka loona xalliyo dhibaatooyinka kahor inta aysan sii xumaan.

Qaramada Midoobey iyo saaxiibbada kale ee caalamiga ihi waxay diyaar u yihiin inay la socdaan Soomaalida tubtan hore loo qaadayo, iyagoo bixinaya xafiisyo wanaagsan ama madal wada-hadal, islamarkaana bixinaya kaalmo farsamoha oo la siiyo geeddi-socodka, iyo la socodka fulinta ballamaha, waa haddii dhinacyada Soomaalidu ay arrintan mid waxtar u arkaan.

Markasta oo ay sii daba dheeraato in dareenka siyaasadeed ee qaranku uu diiradda sii saaro caqabadaha hadda jira ee ku saabsan qabashada doorashooyinka, waxaa sii waynaan doonta saamaynta xun ee ay ku yeelanayso muhiimadaha kale, sida horumarinta amniga, iyo dib u habaynta dhaqaalaha, dhamaystirka dastuurka, iyo cayrsiga ajendaha horumarineed.

Marwo Madaxwayne,

Al-Shabaab ayaa weli sii wada inay khatarta koowaad ku hayaan ammaanka dalka. Al-Shabaab ayaa kordhisey waqtiga howlgalkooda tan iyo Agoosto 2020, waxaana bilowgii 2021-kii la arkay heerkii ugu sarreeyey tirada weerarrada, oo ay ku jiraan kuwo dadka iyo gaadiidka ku fooggan, kuwaas oo lala beegsaday saraakiisha dowladda iyo dadka muhiimka ah ee bulshada Soomaaliyeed.

Guulo muhiim ah oo dhanka ciidan ayaa waxaa sameeyey Ciidamada Ammaanka Soomaaliya oo garab ka helaya kuwa AMISOM kuwaasoo ay ka gaareen gobolka Shabeellaha Hoose horraantii sanadkan 2019-kii iyo mar kale horraanta sanadka 2020-kii, waxaana hadda la sii xoojinayaa si loo suurtageliyo horumarro kale oo ka dhan ah Al Shabaab. UNSOS waxay ku adkaysatay bixinta taageerada AMISOM iyo ciidamada Soomaaliyeed ee xaqa u leh inta lagu jiro muddadan oo dhan, in kasta oo ay jiraan dhibaatooyinka cudurka faafa ee COVID-19.

Dhanka kale, waxaa lasoo geba-gabeeyey howlihii is diyaarinta ahaa ee lagu hormarin lahaa isbeddelka dhanka amniga ee Soomaaliya sanadka 2021-ka, sida uu dalbaday Golahani.

Dowladda Federaalka ayaa soo qaban-qaabisay shirarkii Guddiga Amniga iyo Cadaaladda iyo sidoo kale Madasha Iskaashiga Soomaaliya ee horraantii Diseembar – si loo horumariyo Habka Dhamaystiran ee Amniga iyo Qaab-dhismeedka Isla Xisaabtanka Loo dhan yahay.

Waxaan ku dhiirigelinaynaa Xukuumadda inay sii waddo dadaalladaas, islamarkaana ay sida ugu dhaqsaha badan u qabato Shirwaynaha Dhismaha Ciidanka Xoogga Dalka ee uu ku dhawaaqay Ra’iisul Wasaaruhu. Qiimayn Madaxabannaan oo uu Goluhu u xilsaaray xaaladda amniga iyo doorka saaxiibbada caalamiga ah ayaa loo gudbiyey Golaha 8-dii Janaayo, iyadoo Qorshaha Kala-guurka ee Soomaaliya la cusboonaysiiyey kaasoo ay Dowladda Soomaaliya u soo bandhigtay saaxiibada amniga iyo Midowga Afrika PSC horraantii Febraayo.

Dhammaan arrimahan ayaa ah qodobbada muhiimka ah si loo horumariyo isbeddelka amniga ee sanadkan, islamarkaana dhidibada u aasaya horumar dheeraad ah mustaqbalka.

Marwo Madaxwayne, Xaaladda bini'aadmannimo ee Soomaaliya ayaa weli ah mid aad u xun. Tirada dadka u baahan gargaarku waxay kor uga kici doontaa 5.2 milyan oo qof oo ay ahayd sannadkii hore ilaa 5.9 milyan oo qof sanadka 2021.

Tani waa natiijada cunto yarida sii kordhaysa, masiibooyinka cimilada, ayaxii saxaraha ee ugu xumaa muddo tobanaan sano ah, iyo saamaynta masiibada COVID-19. Nasiib darro, usbuucyadii la soo dhaafay waxaan aragnay kiisaska COVID-19 ee Soomaaliya oo soo cusboonaaday, taas oo ka sii dari doonta xaaladdii bini'aadminnimo ee horraanba adkayd. Soomaaliya waxay xaq u leedahay barnaamijka tallaalka COVAX, Qaramada Midoobey, iyadoo si dhow ula kaashanaysa maamullada Soomaaliya, waxay xaqiijin doontaa in dufcadii ugu horreeysey ee tallaalka si hufan loogu qaybiyo shaqaalaha safka hore iyo kooxaha nugul ee dalka oo dhan.

In kasta oo aan si qoto dheer uga mahadcelinayno tabarucaadda deeqsinimada leh ee deeq-bixiyeyaasha sanadka 2020-ka, baahiyaha bini'aadminnimo ayaa sii ahaan doona kuwo sarreeya,

waxaana mar kale codsanaynaa taageerada deeq-bixiyeyaasha Qorshaha Waxqabadka Bani'aadminnimada ee 2021-ka, kaas oo loo codsaday $1.09 bilyan oo dollar.

Qoyska Qaramada Midoobey waxa ay sidoo kale sii wadaan in ay kala shaqeeyaan maamullada iyo saaxiibbada Soomaaliya xallinta mustaqbalka fog ee musiibooyinka bini'aadminnimo ee soo noqnoqda. Tusaale ahaan, La-taliyaha Degaanka ee Howlgalkeenna ayaa kala xaalaya dowladda inay horumariso siyaasado iyo istaraatiijiyado la xiriira cimilada iyo sidoo kale jawaabaha la taaban karo ee wareegyada fatahaadaha iyo abaarta ee ay saameeyeen xaaladaha cimiladu.

Marwo Madaxwayne,

In kasta oo warbixinnadan saddexdii biloodba mar ay diiradda saarayaan horumarradii ugu dambeeyay ee siyaasadda, amniga, iyo bini'aadminnimada, waa in aan mar walba niyadda ku hayno in isbeddel wanaagsan oo waara oo Soomaalidu la timaado uu u baahan yahay hay'ado dhisid; hagaajinta maamulka iyada oo loo marayo waxyaabo badan oo ay ka mid yihiin dib u habaynta dastuurka; maalgashiga caafimaadka iyo waxbarashada; ka qaybgalka ballaaran ee haweenka, dhallinyarada iyo kooxaha la haybsooco; iyo dib u habaynnada kale ee mudada dheer. QM Soomaaliya waxay sii waddaa shaqada ah inay Soomaalida kala shaqayso dhammaan dhinacyadaas, iyadoo la ogsoon yahay inay taasi u baahan tahay adkaysi iyo dulqaad.

Waxaa lama huraan ah in yoolalkaas mustaqbalka ee ballaarani ay ay kasoo butaacaan maskaxda hoggaamiyeyaasha siyaasadda Soomaaliya. Dadka Soomaaliyeed ayaa muddo dheer sugayey in ay arkaan horumar, waana mid weli nugul. Taasi waa sababta aan ugu soo gabagabeynayo in aan ku boorriyo dhammaan hoggaamiyeyaasha siyaasadda Soomaaliya in ay dib uga laabtaan iska hor imaadka oo ay ka fogaadaan xeeladaha khatarta ah ee guuleystihii ayaa wixii wada qaatay.

Taa beddelkeeda, waa markii la raadin lahaa wadahadal iyo isu-tanaasul si loo gaaro heshiis siyaasadeed oo loo dhan yahay islamarkaana lagu kalsoonaan karo si loo qabto doorasho sida ugu dhaqsaha badan iyadoo lagu salaynayo moodalkii ama qaabkii 17-ka Sebtember.

Mahadsanidiin.